

1.3

Ku kaalmaynta guriga ilmahayga yar iyo annigu ma heli karaa?**Waa maxay Home And Community Care (HACC)?**

Golaha degmada ee agagaarahaaga ayaa leh adeegyo loogu yeero Home And Community Care (HACC) waxana heli kara dadka iinta leh.

Adeegyada HACC waxaa ka mid ah:

Daryeelka nasniinta

Xarakaad kasta oo uu siiya daryeelle fasax gaaban oo uu ka qaato qofka uu daryeellayo

Daryeel guri

Caawimo guriga lagu bixiyo iyada la qabanayo shaqo sahlan oo guriga iyo wax soo gadid

Daryeel shakhsiyeed

Ka caawinta qofka faya-dhowrka sida u qubaynta iyo u lebisada

Adeegyadani waa lacag qiimuhuna dhaqaalahaaga ayuu ku xiran yahay. Si aad ula hadasho qof wixii khuseeya qiimaynta la xiriir golaha degmada weydiina inaad la hadasho kooxda Qiimaynta Ku-daryeelida Guriga.

Arag xaashida macluumaadka 4.7 oo kitkan 'sidee kula xiriiri karaa golahayga degmada' si aan u hello adeegyada golaha.

Side ku ogaanayaa haddii ilmahaygu xaq u leeyahay adeegyada?

Dhamaan kharajyadu waxay leeyihiin shuruudo. Xeerka cusub ee linta 2006 waxa la hirgeliyey Juulay 2007. Xeerku wuxuu sheegayaa dadka qaba ciladaha jireed, dareen, dhawaaca ka gaaray maskaxda, iinta garaadka ama dib u dhac koritaan ayaa heli kara adeegyada iinta.

Waxaad ka codsan kartaa qiimayn rasmi ah Wasaarada Adeega Aadanaha marka ilmuhu gaaro 6 sanadood. Ilmahaaga waa la qiimayn karaa si loo diiwaangelin geliyo macmiile ahaan si aad u hesho adeega Wasaarada ama waxay kuu gudbin karaan kaalada kale ee bulshada.

Wac Kooxda Intake and Response oo ka tirsan Wasaarada Adeega Aadamiga tel: 1800 783 783 wixii macluumaada ah oo intaas ka badan.

Waxaa kaloo laga yaabaa inaad akhrido macluumaadka xaashida 4.5 kitkaan 'tani markii ugu horreeyey oo aad isku daydo inaad hesho adeegaan baa?' iyo 1.4 'ma u baahan tahay caawimo aad ku hesho madadaalo iyo xalalka nasniinta ee ilmahaaga yar?'

Waa maxay xalalka kale ee ku caawinta oo aan haystaa?

Royal District Nursing Service (RDNS) waxaa laga yaabaa inay awoodaan inay kaa caawiyaan baahida daryeelka ilmahaaga. Wac 1300 657 265 waxaana lagugu xiri doona xafiiska kuugu dhow.

Waxaa kaloo jira barnaamijyo sida **Extended Families Australia** kaas oo dadka qaangaarka ah la raadiya qof dhalinyaro ah oo iin leh. Waxaa laga yaabaa, tusaale ahaan, inay u yimaadaan lana lumiyaan waqti ilmahaaga iyagoo ku siinaya kaalmo siyaada ah si aad wax kale u samayso. Macluumaad intaas ka badan wac 8311 4044.

Adeegyada Abercare Family Services wuxuu siiyaa **Adeegyada Faragelinta Hore ee Ilmanimada [Childhood Intervention Services (ECIS)] Kaalmo wada-socota oo la rogroggi karo (Flexible Support Packages)** xaafadaha waqooyiga iyo galbeedka. Kharajbixintaasi waxaa loo isticmaali karaa nasniin, qalab gargaar, dabiici ku daaweyn, kaalmada ilmanimada hore iyo kaalmooyin kale ee weheliya. La xiriir Xiriiriyaha Kayska Faragelinta Hore tel: 9373 3800 si aad wax badan uga ogaato.

Waxaa kaloo jira adeegyo kale oo gaar loo leeyahay oo awoodi doona inay guriga kugu siiyaan kaalmo lacag ah. Ka fiiri "attendant care" buugga loo yaqaan yellow pages.